Nidaamka Dugsiyada







Qoraa
Maxamed Yuusuf Cige


NIDAAMKA DUGSIYADA

Waxaynu U Maleynaa In Waxbarasho dhammaanteed ay tahay Iskuul .

Kaalay ila Milicso Iskuullada .

MAXAMED YUUSUF CIGE LIIBAAN

Wixii aan daw ahayn
Damiirku ka dhiidhiyaayo
Adigu aad diiddantahay
Siday dadku u qaataan ?
[Cabdifataax Maxamed - on FB]


- كتبنا وما كتبنا .
- ويا خسارة ما كتبنا .

AFEEF HORE …

- Ujeedka buugani waa burinta Fikradda ah in Ubadka Iskuul la geeyo, Waxaanu Meesha ka Saarayaa In cabir laga dhigto Iskuulka si loogu qiyaaso Bislaanshaha caruurta iyo Korodhka cilmigooda .

Waxaan kasii afeefanayaa in waxkasta oo burinta fikradda Iskuulka ah loogu tegi doono buuga. Sidoo kale Aragtida buugu maaha Biyo-kama-dhibcaan . Laakiin waxaan hubaa in dhanka Xaqiiqada Uu buugani xooga-saarayo .

Alle ayaa Mahad-leh.

Maxamed

Yuusuf

Cige .

MA OGTAHAY IN …

GARASHADA IYO FAHANKU AY KALA LABA YIHIIN OO KALA MADAX-BANAAN, WELIBA UU FAHANKU SII QOTA-DHEERYAHAY LABADA. BUUGANI WUXUU ISKU DEYAYAA IN UU KU FAHANSIIYO ISKUULKA AAD TAQAANO .



Hibeyn

Buuggan waxaan u hibeynayaa Waalidiinta - Ubadkooda waxbarasho la doonaya, Iyo Dhalin-yarada Tacliinta Raadineysa ee ay Marin-habaabiyeen Iskuuladu .

Maxamed

Yuusuf

Cige.

Fur-furasho .



- **Buugani** waa daraasad ku saabsan Iskuulada, waxaanu naqdinayaa Nidaamka ay u shaqeeyaan iskuuladu, sidoo kale waxa uu soo jeedinayaa fikrado bedel u noqon kara Iskuulada .

Magaca buuga: Nidaamka Dugsiyada .
Qoraaga: Maxamed Yuusuf Cige .
Cover design: Maxamed Cismaan Xasan Muumin.
Tirada bogagga: 112 bog.
Tifaf-tir: Maxamed Cismaan Xasan Muumin.
Cabirka buugga: 5.83 × 8.27
Tirada daabacaada: Tii 1aad, **1443 / 2022**
ISBN: 978-1-23-456789-7
Dawlada: Somaliland .
Mawduuca: Daraasad .
ISSN: 977-1-23-456789-8

® **Copyright: Dhammaan Xuquuqda buugani waxay u ilaashantahay Qoraaga, lama ogola daabicid, badin, sawirasho, Tarjumaad iwm si-kasta/nooc-kastaba , iyadoon fasax laga haysan Qoraaga . Hadii lagu xad-gudbo xuquuqdan, Waxaan la tiigsanayaa Maxkamadaha gudaha ama dibedda, Ama waxaan la sugayaa Maxkamada Aakhiro .**

© All Rights Reserved for the Owner / Writer.

H0R-DHAC

- Waxaan dhigtey 7 iskuul, waxaan arkay 207 macalin, waxaan la hadlay macalimiin , Waxaan wareystay arday fara-badan , waxaan qiimeeyey waxa la dhigayo, waxaan darsey Buugaagta manaahijta, waxaa ii cadaatay in ayna wax-badan ku kala duwaneyn, waxaan Dareemay in badanka ardaygii aan loo faa'iidaynayn, Nidaam eber ah , buugaag faa'iidadoodu Ay aad u yartahay , maamulayaal iyo macalimiin aan qiimo lahayn .

Waxaan go'aansaday in aan buugan dadka ugu cadeeyo waxa iskuuladu yihiin, kuna buriyo Iskuulada – gaar-ahaan kuwa ku yaalla dalalka Islaamka iyo soomaalida --,

Waalidkii wuu ku wareeray in caruurtiisa ay wax-badani ka khaldan yihiin hadana uu horey ugu direy iskuul , Iskuulku ma goob waxbarashaa mise waa goob dayacaad ?, Waqtiga uun lagu lumiyo , Anigu ku odhan maayo *" ka tag iskuulka "* oo tani waa Amar, balse waxaan qoraalkan kugula wadaagayaa tijaabadayda iyo Aragtiyahayga iskuulada ku saabsan - maadaama aan 10 sano u soo joogey qasabna ay tahay in aan khibrad ka haysto, Kadibna go'aanka adiga ayaa leh . waxaan odhan lahaa :-



" Iskuulku waa shirqool aqooneed iyo waqtiyeed ee ay inoo soo maleegeen gaaladu " .

Qaybta 1aad:

-Taariikhda Iskuulada .



Taariikhda Iskuullada

- Fikradda Iskuulku maaha mid cusub, Waqtiyadii hore waxa soo muuqatay baahida gudbinta macluumaadka, laakiin May aheyn sidey imika tahay, Waxa dadka isaga kala gudbi jirey Waagaas Xirfadaha, weyna kasoo muuqatey xadaaradihii hore **. {[1]}**

Sheekadu waxay ka bilaabantay boqortooyadii *Brussia* **{[2]}**, Xilligii boqorkii la odhan jirey **" William Fredrick "**Kii koowaad, Xiligaas dawladu waxay u baahnayd Ciidan xooggan, laakiin ciidameynta dadka ayaa adkayd, ilo kale ayaa Tilmaamaya in waxa ku riixayey uu ahaa jabkii Bonaparte soo gaadhsiiyey Brussia, kadib baadhitaan iyo Fikrado, Waxa la Aasaasay Nidaamkan Iskuulka ee brussianka ah si loogu adoomeeyo caqliga Qofka maaha si loo garaad-badneysiiyo, Natiijo ahaan, burburinta fikirkii caruurtii waagaas dhiganeysay ayaa ka dhalatey.



Aragti kale ayaa dhigeysa, In kadib kacdoonkii wershadaha yurub loo baahday dhallin ka shaqeysa wershadaha, Habkii keliya ee xilligaas waalidiintoodii looga qaadi karayey wuxuu ahaa in Tacliin qasab ah lagu Amro caruurtaas, Odhaahdii "Hoarce" ayaana ku dhabowdey bulshada, wuxuu yidhi :- "Dawladu waa Aabaha**". {[3]}**

Masaajida ayaa goobo waxbarasho u ahaan jirey carabta kahor qarnigii shanaad ee hijrada, "Nidam Al-Malik" oo Ahaa wasiir ka tirsanaa dawladii Salaajiqada **{[4]}**, ayaa Aasaasay Mac-had u shaqeeya sidan ay maanta Iskuuladu iyo Macaahidu u shaqeeyaan, 459 hijrada

---

[1] - AL-JAZEERA NET.

[2] - Maaha Russia, **Brussia** waxay ahayd boqortooyo hore uga jiri jirtey Jarmalka.

[3] - oktob.io/posts/9869

[4] - Dawlad markii dambe isu bedeshay **Cusmaaniyiintii.**

ayaana Mac-had laga furay dawladii Salaajiqada. Ujeedka muslimiinta ee Mac-hadku wuxuu ahaa si loola dagaalamo - fiditaankii shiicada wacyi-ahaan, laakiin dagaaladii kiristanka ayaa ka Dhigey mid u gudba yurub iyo Mareykanka .

Sidoo kale, markii Masar uu Salaaxu-diin{5} ka qabsaday shiicada, ayaa Jaamacadii Azhar-Shariif ee masriga ahayd ay Mac-had ahaan ugu qaadatey Nidaamkan.

Markii uu Nidaamkani Yurub gaadhay, waxa suure-gal noqon waayey in nidaamkan lagu dabaqo kiristanka, laakiin waa La calmaaniyadeeyay, 1840 miilaadiga ayaana Mareykan laga furey Iskuulkii ugu horreeyey, kadib dagaalkii labaad Awood ayaa lagu faafiyey Nidaamkan, Islaamka iyadoo laga dhigayo mid ka mid ah maadooyinkaas oo Tarbiyad loo bixiyey ayuu soo galay Dalalka Muslimiinta. {6}

Ilmihii markuu waxbarasho bilaabo, doorasho xun ayaa hortaal :- Diini ama Maadi ! {7} . oo dalkii Macaahid iyo Iskuulo Ayaa ku yaal, Anigu waxaan arkaa in inta wax-taraysa laga qaato maadiga oo lagu daro Macaahidda la isku dhigto diin Iyo xirfad / cilmi wax-taraya .

***


5 - Suldaankii Aasaasay dawladii Ayuubiyiinta furtayna Qudus 583 hijriga.

6 - Al-Jazeera.Net

7 - **كتاب: العلم وبناء الامم – للدكتور راغب السرجاني.**

Qaybta 2aad :

- Odhaahyo laga yidhi Iskuullada .



- Qaybtani waa odhaahyo aan soo qaatay una celiyey cidii tidhi , kadibna sharaxaadeyda aan ku hoos qoray si aad u fahantid !

1)

" Cidii furta albaab Iskuul, waxey xidhaa albaab jeel ".

- Victor Hugo ~ Abwaan Faransiis ah

- U fiirso, Wuxuu ninkani leeyahay – hadii aad furto iskuul, waxaad xidhaysaa jeel. Hadalkani waxa uu u muuqdaa ammaan lakin maaha, Qof ka yimi jeel sidee ayuu kuula ekaan lahaa!, weliba ilmahaagii aad u dirtay iskuulka uu ag-fadhiyo,
  Jeelasha miyaan lagu xareyn dadka dambiyada loo xidho – dil, boob, dhac, xatooyo iwm – Ama kuwo dagaal loo soo xidhay,
  Dadka iskuulada joogaa weliba soomaalida aad ayey u xiiseeyaan dagaalka, sidaan arkay, Akhlaaq-ahaanna badankoodu ay hooseeyaan.





2)

" Ka warrama haddaan idiin sheego in, Buugaag-dugsiyeedka Aanu hayno, ay ardayda baraan sidii ay u noqon lahaayeen askar milateri, halkii ay ka noqon lahaayeen culimo baadheyaal ah ".

- Cali Alwardi ~ (1913 ---- 1995).

- Sida ku qoran Wikipedia, Ninkani waa ciraaqi, waana macalin iyo Taariikhyahan yaqaana cilmiga bulshada, wuxuuna ku baaqi jirey Calmaaniyadda .

Halkaas markeynu kaga nimaadno wuxuu yahay, inkastoo calmaaniyadu{[8]} ay tahay gaalnimo, hadana waxaan u arkaa in Iskuuladu yihiin laanta waxbarashada ee calmaaniyadaas, sababtoo ah Iskuulo wey ku yaallaan dalalka yurub iyo Ameerikaba, waana iskuulo calmaani ah oo wax diin muujinayaba aan laga aqbalin .

Iskuulada dalka ku yaal Amar keliya ayaa uga dhiman si ay kuwa galbeedka ula mid noqdaan.

Ninkani wuxuu leeyahay, halkii culimo wax baadha ay ka soo saari lahaayeen iskuulada Ciraaq waxey soo saareen askar milateri, Iskuulada maadiga ah waa khatar oo Mabaadi'da iyo Qiyamka si fiican uma baraan ardayda, Tanina waxa ay wadada u sii xaadheysaa suurta-galnimada in Iskuul calmaani ah laga furo deegaannadeenan kadibne Iskuul-kiristan, sida ka dhacdey Imaaraatka ama UAE, sidey xusayso shabakadda islam.web.

Halkan soomaalidu degto, Iskuuladu waxa ay dadka baraan sida addoon fiican loo noqdo looguna adeegto, oo ciraaq ayaa dhaantaba Soomaalida Iskuul-ahaan.

---

[8] - **Calmaaniyad: waa kala saaridda diinta iyo dawladda.**

Websiteka **madrassatii.com** wuxuu Ammaanayaa Iskuulada Ammaan meel ay ka timi aan la garaneyn markaa ha dhageysanina .











3)

" Haddaan xukumo Caalamka, waxaan ku bilaabi lahaa ka-xoreynta caruurta caalamka aan ka xoreynayo Tacliinta qasabka ah ee aan laga shakiyi Karin iyo Tacliinta khuraafada ".

- Daniel dinet ~ Qoraa Maraykan ah .

- Wey jiraan Tacliin qasab ah iyo mid khuraafo ahiba, Macalin ayaa maalin igu yidhi: Ardayda waa u dhignaa in meel banaan uu cirku ama spaceku yahay dhulkuna wareego, wuxuuna ii sheegay iney ku dhahaan ''Qaata ama beeneeya'', Tanina waa Iskuulada. Halka Qur'anku kuwan lidkooda uu dhigayo, Oo ay Cadceedu wareegto dhulkuna taagan-yahey, balse cadceedu ay tagto carshiga hoostiisa kadibna Allah ay u soo sujuudo sida ku sugan xadiiska. Samaduna ay saqfi tahay oo maaha meel-banaan, Haday meel banan tahay gantaalkii shiinaha ee bishii May 2021 – muxuu ugu yaraan uga fogaan waayey shiinaha ?, Habeeno dhan ayaa lagu qaylinayey itoobiya iyo soomaaliya inuu dul-marayey, hadana wuxuu ku dhacay badaha Maldives sida la sheegay .

'' Indhuhu faa'iido maleh marka caqligu cawaranyahey " →




4)

“ Ilmaha tacliintiisu ku kooban-tahay Iskuul, waa ilmo aan waxba baran “

- George Santayana ~ Abwaan Isbaanish ah.

- Waa run hadalkani, oo ilmihii xirfado ma yaqaano hadduu iskuul keliya soo dhigtey, Taasna looma baahna.
  Xataa qur’aanka marka la joogo dugsiyada hoose, Ardaygii caadi looma barayo, Googo’ badh laga boodey ayaa la barayaa, sidaan arkay .
  Caruurta bara diintooda Islamka iyo xirfado ay ku shaqeystaan.
  Bislaanshaha qofka laguma qiyaaso darajooyinka Iskuulka .






5)
“ Hal canug, hal macalin, buug keliya iyo qalin keliya ayaa beddeli kara dunida, Tacliinta ayaa xalka ah, Tacliinta ugu horreyn “.
- Malala Yusuf Zi ~ Pakistan .

- Gabadhani waxey u doodi jirtey waxbarashada dumarka ee Pakistan,
  Eeg, may odhan iskuul, hal canug oo buug iyo qalin sita oo la jooga hal macalin ayaa saameyn weyn yeelan kara, Bedelida dunidu waa sarbeeb loo adeegsado in lagu cabiro Saameynaha waaweyn, cidi ma bedeli karto dunida oo taasi waa riyo .

  Iskuul la’aan iyo sidan ay sheegayso – waa siduu wax ku bartey Al-Ma’mun oo ahaa khaliifkii Cabaasiyiinta casrigii dahabiga ahaa ugu dambeeyey .
  Imam sida Shaafici ama Axmed binu xanbal ma ayna aadin Iskuul, Sidaa darteed tacliintu kuma koobna mana aha Iskuul, Tacliin waa waxbarasho, waxaana lagu heli karaa Tarbiyad-waalid, Wax-is-barid, Sheekh la dhageysto oo su’aalo cilmiyeed la weydiiyo, waayo-arag la wareysto, Ama xirfadle ku bara xirfado .

Tacliin kuma helaysid Iskuul.





6)

“ Iskuulada: waxaynu baranaa casharada, kadibna waxaynu marnaa imtixaanada.
Nolosha: imtixaanada ayeynu marnaa kadibna waxaynu baranaa casharada “.
- Ibrahim Alfiqi .~ Hadlaa’ Masri ah.

- Iskuulku inta uu shay baro qof ayaa kadibna shaygaas uu baray uu imtixaan kaga qaadayaa, shaygaas uu barayo muhiimad uma leh qofkan, wuu dhaafi oo wuu ilaawi qofkani illeen waa qasabee, waxaana qasab ka dhigeysa baahida aan loo qabin.





Ogow shay kastaa xumaan iyo samaan wuu leeyahey; Iskuulkana xumaantiisa ayaa badan sababtoo ah wixii muhim ah [Diin, Xirfad, Waayo-aragnimo] wuu kaa mashquulinayaa iskuulku, oo wax Aanad uba baahneyn ayuu baahidiisa kugu abuurayaa, kadibna baahidaas uu kugu abuuray wey dhici imtixaanka kadib, dababeed qofkaas oo faro-madhan ayaa kasoo bixi Iskuulkaas.

Tusaale haddaan ka bixiyo wey dhacdeyba, Kanaalka YouTube ee “MM TV” Cinwaanka Muuqaalka ah “Qalin-jabisaye maxaa xiga ?”, muuqaalkan wuxuu kaga Hadlay Inan iskuul iyo jaamacad ka qalin-jebisey kadibna meel ka dalbatay shaqo, CV soo qoro ayaa lagu yidhi, balse warqad intay kasoo jartay buuga caadiga ah ayey 2 layn ku qortay kadibna ay u geysay, Hadii CVgaaga la af-garan waayo baaldiga xashiishka ayaa lagu ridaa, tanina iney dhacdey ayaa aan filayaa, anigu ma daawan muuqaalkoo –

dhamaystiran se waan arkay muuqaalka lakin nin la dhaho Fayr Ibrahim ayaa iiga sheekeeyay.

Meesha xaqiiqadu ku yartahay waa Iskuulada, hadaanad fakarinna dameeri dhaan raacdey ayaad noqoneysaa. Iskuulka hadaad xataa ka qalin-jabiso kuuma sababayo shaqo , markaad CV qoraysid looma baahna Iskuul, Halka wax laga barto ee keliyi waa Tijaabada.






7)

" Iskuulku waa waxyaaluhuu ka tegay gumeysigu, wuxuu faa'iido u yeelan waayey waa Manhajka ".

- Maxamed Fadalle ~ Form4 ~ Jan 2022.

- Haa waa sax, waa waxyaaluhuu inagaga tegay Ingiriisku, mana leh faa'iido,
  Manhaj tajriibi ah oo xirfadeed iyo muddo aad uga gaaban tan haddii aan loo sameyn faa'iido maleh.






8)

“ Meel sax ah hadey lacagtaasi tegayso, waa caadi “.

-Niciima Ciise ~ Form 3 ~
Jan 2022.



- Waxay sheegaysaa fiiga ama bisha, taas oo marka aan xisaabiyo 12 sano aad iskuulada gaarka ah soo dhigatey Primary iyo Secondary, lacagta kaaga baxdey ay noqoneyso 1580 $ dollar ugu yaraan iyo ku-dhawaad 12kii sano, iyo 12 sano oo da’daada ku korodhay.
  Sidoo kale markaad xaqiiqsato in faa’iidada ku khuseysa ee aad ka heshay iskuulka – ay aad u yartahay, khasaare cumri iyo lacageed oo weyn, Marka hawo uu noqdo tacabkaagu !



9)

" Aqoontu waa iney wanaagsanaataa ".

- Daa'uud ~ Form 1 ~ Jan 2022 .

- Intan ayuu ku taliyey wiilkan aan ka wareystay Iskuulada. Wuxuuna daliil cad u yahay in tayada waxbarashada iskuuladu Aaney wanaagsaneyn, aqoonta uu sheegayona waa tan iskuulada lagu dhigo, oo cilmigu waa wixii wax tara oo anfac leh.
  Aqoontu maaha hebel meel ku dhashay inaad warqad ku qorto kadib markaad ogaatey.
  Waxaa jira cilmi aan waxba tarin sida kan lagu dhigo Iskuulada .




10)

" 4 sano oo toban maado la dhigto Somaliland ayuunbaa lagu yaqaan, 1ka sano ee jaamacadaha dalka ugu horreeya waxa lagugu soo celinayaa 10kii maado ee hore, taana waa laga fiicanyahay, Itoobiya ardaygu markuu jaamacad ka baxo shaqo ayuu helaa, halka dalkanna taa lidkeedu ay ka jirto ".
-Feyr Ibrahim ~ Form2 ~ Jan 2022 .

- Waa in takhasus la helo, iskuuladu maleh takhasus, 12 sano oo takhasus la'aan ah looma taag hayo, shakhsiyan luuqad ama wax-kale kamaan baranin iskuulka. Oo si fiican looguma baro iskuulada, Tusaale ahaan Ingiriisida si fiican looguma baro ardayga ama ardayadii, bilow grammar ah ayaa loogu dhigayaa toban sano kadibna gabayo ingiriisi ah ayaa la isaga dhigayaa ...
  10 maado oo hal-mar afka lagaaga shubayo oo midiiba Aaney dhameystirneyn waa hawo.
  Fursadaha shaqaduna wey yaryihiin lakin ogow iskuul weligaa kuuma sababayo shaqo.






11)


" Iskuuladu waxay bixiyaan isla shaqooyinka bulsheed ee ay bixiyaan jeelashu iyo daaweeyeyaasha caqliyeed – waana in ay shay ku baraan kadibna wixii hore ay kaa gal-siibaan kadibne ay maamulaan oo joojiyaan dadka ".

- Paul-michel Foucault ~ Qoraa faransiis ah .

- Iskuul waakaas, wuxuu dadka u tabo-barayaa sidii ay adoomo u noqon lahaayeen. Iskuuladu waa wada sidaas.



Iskuulada uu ninkani sheegayo waaba ay dhaamaan kuweenna, oo kuwa uu sheegayo shaqo ayey bixiyaan, laakiin kuweennu waqtiga uun ayey gumeysi kaga lumiyaan ardayda .







هدف التعليم ؟ ما هدف التعليم ؟ التطوير المتكامل للشخصية الانسانية ام التخصص الصناعي الدقيق للحيوان العامل



Hekams.com / علي عزت بيغوفيتش

12)


" Practical malaha Iskuuladu ee waa Aragtiyo, waalidkuna wuu khalad-fahmay waxbarashada oo waa iskuul uun ayuu u maleynayaa ".


-C/casiis ~ Arday Soomaali ah.

- Waa sax, iskuuladu malaha wax gacanta laga qabto, sidaa aad sheegtay .
  Markaas goobaha xirfadaha laga barto ayaa aad uga fiican iskuulada, oo iyagu waa mar casharka ah kadibna loo qabanayo ficil-ahaan. Sidoo kale, koorso gaaban ama **Short-Course** ayaa kun jeer ka qiimo-badan Iskuul.
  Sidaas darteed, Faa'iido maleh iskuuladu .











13)

" Tobanka buug ee la inoo dhigo, mid aan khaldanayn ma jiro ".
-C/kariin Axmed ~ Arday somali ah.



- Waxa la yidhi :- **Runta oo aad kala-badhkeed sheegtaa waa been.**
  Sax weeye oo ma jiro buug sax ah oo lagu dhigto iskuulada, ka-gaadhsiis aan habeysneyn weeye.

  Buugaagta manhajka waxa ku jira Nin ay culimadu hadalladiisa gaalnimo ku sheegeen, waana: Abulqasim Alshaabi. Gabayada ninkan uu qaddarka Allah ugu duwayo dhanka shacabka ayaa ku jira Buugaagta Iskuulada, tanina waa gaaleysiin cad !



  Buugaagta manhajka waxa ku jira cutub hidde-sidaha ka hadlaya, kaas oo maalin uu macalin nagu yidhi: *"Uma dhigi karo hablaha, soo akhrista ayaanan ku idhi".*

  Runta marka laga hadlayo Iskuuladu maleh waxtar,- YEEL AMA DIID, - haddii ay waxtar yeeshaanna {waa dhifee} waa mar ay si **boor-isku-qaris** ah ugu soo jiidan rabaan bulshada, Si ay lacag uun uga korodhsadaan, ardaygana ay jahliga ugu sii seeta-dheereeyaan .




USA may gaadhin dayaxa, ee waxa film lagaga jilay qolalka Hollywood/Bollywood














14)

" Waxaan Aaminsanahay in aysan fiicneyn, Maxaa yeelay; waxaad luminaysaa 12 sano oo ka mid ah Cumrigaaga. Sidoo kale waxaad Luminaysaa lacag dhan $1580 dollars ah oo 12 sano aad bixineyso. Markaa waxaad baraneyso laga yaabaa iney ku Caawin doonaan marka la Eego noloshan adduunka, lakin waxeynu u baahannahay adduun iyo Aakhiroba ineynu u shaqeysano, markaa labada daarba kama madhno. Markaa Anigu waxaan ka Eegay dhinaca Aakhiradeen maadaama kulligeen safar ku jirnay ".


-Caa'isha Caydaruus ~ Macalimad.

- Waxkasta oo la-abuure ah Samaan iyo xumaan ayuu leeyahay marka laga soo reebo shaydaanka oo shar mudlaqa ah, iyo Malaa'igta oo kheyr mudlaqa ah.
  - Iskuul samaan iyo xumaan wuu leeyahay lakin xumaantiisa ayaa xad-dhaaf ah oo badan.

  Markaad dhameyso Iskuul hoose iyo sare ayaad is-arki adiga oo 12 sano kuu korodhay lacag badanina ay kaa baxdey – wax faa'iido ahna aad waxyar hayso, tani waa xaalada ka jirta Iskuulada.

  Inantan macalimada ah sidoo kale waxay baratay ama dhigatey shareecada. Qeexid wanaagsan ayey siisay Iskuulada kuwaasoo haddii dhinac kastaba la iska taago ay hooseeyaan. 12 sano inta la-abuure ee aad baraneyso oo Malaayiin gaarayo, Allah maxaad u baran weyday ?!

Cumriga ugu badan ee qofku waa 60 ilaa 70 sano, 12 sano igama go'i karto, waa inaan wax faa'iido leh oo Iskuulka dhaama aan ku bixiyo. Ogowna ardayda macaahidu wey necebyihiin Iskuulada .




→ Laga yaabaa inaad i weydiiso su'aashan :-

-Haddii aan iskuulka ka tago; xagee Aadaa illeen Jaamacad i qaadaneysaa ma jirtee ?

- Marka hore, dunida ha isku soo xidhin ayaa aan ku odhan lahaa. Jaamacadaha dowlada oo keliya ayaa qorta ardayda iskuulada soo dhameysay oo ay taas shardi kaga dhigaan. Laakiin, Haddii aad *Diploma* ka sidato Jaamacad waxay doonto ha ahaatee – kuwa gaarka loo leeyahay wey ku qoranayaan. Waa siduu ii sheegay macalin dhiga Computerka iyo Englishta.
- Marka labaad, shaqo keliya hadaad Aadid ayaa lagu weydiin Shahaado-Iskuul., Macalin-iskuul hadaad dooneyso inaad noqoto Shahaado-Iskuul waa lagu weydiin, Oo shardi ayaa lagaaga dhigi.


  - Laakiin, shaqooyinka kale cid kuma weydiinayso Iskuul-shahaadadiis. Xirfad ayaa lagaaga baahanyahay shaqooyinka kale. Intan xogta sare waxa ii sheegay Macalin Qalinle.



15)

" Waxaan qabaa in Manhajka la Tayeeyo ".
-Maxamuud Saleebaan {Qalinle} ~ Macalin.

- Arrintaas in buugaagta Manhajka la cusbooneysiiyo, dad badan ayaan ka maqlay in haddii la yidhaahdo: Manhaj cusub ayaa soo baxay, Iney dhahaan galka keliya ayaa la bedelay, wixii kale waa sidoodii.
  Ha la tayeeyo buugaagta Iskuulada waxa ku qoranna ha la eego oo dib u habayn ha lagu sameeyo.
  Manhaj xirfadeed iyo muddo gaaban hadii aan la helin, Ha la laalo Iskuulada. ↓



16)

" Waqti badan ayaa kaaga lumaya ".

-Mushtaaq C/risaaq ~ Macallimad .

- Waa Run, Waqti badan ayaa kaaga lumaya Iskuulka, Waanigii hore u soo sheegay In cumriga qofku uu yahey 60 ilaa 70 sano, Kamana go'i karaan 12 sano uu ku bixinayo Haan gun la' .





17)

" Kolkii Aan dhigan lahaa 4 sano Iskuul, waxa ii wacan inaan Mac-had galo, Waayo – Lacagtaydu wey ii madhxaysaa / Dhawrmaysaa, diintayna waan baranayaa. Basna igama baxayo. Taasaa ii wanaagsan ".
-Salma Garaad Cismaan ~ Macalimad .

- Inantani waxay Tusaale cad oo nool u tahay Hablaha dhigta Iskuulada, Waxaan la hadlayaa gabadh kasta:- Baro diintaada si jiilasha soo kacaya aad ugu tarbiyeyso hadhow. Taasi waa iga talo walaal. Ogowna -In Asma bintu Abii-bakar ama Nusayba bintu Kacab – Aaney ka qalin-jabinin Iskuul, Si la mid ah Hooyooyinkii Asxaabta Madaahibta 4ta ah. Waxa dhici karta mararka qaar in Noloshu kugu kalifto inaad Shaqeyso, Xirfado baro si aad hadhow ugu shaqaysato sida inantan macalimada ah ee aynu soo werinay hadalkeedan Quruxda Badan .

18)






" Habka Iskuuladu u socdaan, Waa in wax laga bedelo ".
-C/qani Cawil ~ Arday .

- Fikraddan dhammaan weynu ku raacsannahay C/qani. Laakiin.. dhinac kasta ha laga bedelo Iskuulada, **Waxa Iskuulada looga baahanyahay :-**
  Muddo Sannad ka yar, Manhaj xirfadeed, Macalimiin togan, Maamul aan aheyn Fircoon oo kale, Iyo niyad Allah-dartiis ah ee aan aheyn lacag !

  Haddii intan laga waayo Iskuulada, Waa in Joogitaanka laga Masaxo {La tirtiro} . Albaabadana la isugu laabo !
  19)





" 1 ilaa 8, Faa'iido kuuguma jirto ".
-Nimco Ibrahim ~ Ardayad .

- Iyadoo sidaas arrintu ah ayey hadana kuwa Macalimiinta ah Ee dhiga Iskuulada-hoose ay dhangadeeyaan ilmaha. Taariikhda dib u raaca, Salaaxu-diin miyaa la dhangadeeyay si uu u furto **Qudus ?**

  Ilmuhu wuxuu dhangadda ka qaadaa Kalsooni-darro iyo sas. Wax uma hagaajineyso dhangadu, ee **wax-u-sheeg** ayaa waxtara caruurta.

  Hadey khalad galaan ama khalad hore soo celiyaan, waa bini'Aadam ee maaha Malaa'ig. U dhaafa oo u dulqaata, laakiin- ilmaha yaan Iskuul lagula Cararinee – imaha bar oo ku tarbiyee kuna barbaari diintiisa/teeda **Islaamka, Korinta** oo keliyi uma noqoneyso Tarbiyad, ee tarbiyee, Markuu caqliyeysto kadib, Waxaad bartaa xirfadaha oo adigu waalidkoow bar ama meelaha xirfadaha lagu barto gee kuwaas oo muddo kooban ah iska ilaali kuwa ila-meereysada ah.





20)

" Hadaynu Iskuulka ka tagno, waalidiinteen ayaa ina-moodaya dad wax-ma-tarayaal ah oo nolosha ka dhacay, Xilligan aynu joogno dalalka kale Qaab ka fudud kan aynu wax u barano ayey adeegsadaan. Halka Innaga Primary, Secondary iyo Jaamacad ay inagaga baxayso 18—23 sano innagoo waqtigii dhalinyarnimada dhameysaney ".

-Cawaale Jaamac ~ Arday.

- Maladu waxba kama aha xaqa, Waalidiinta waxaan odhan lahaa **Wax ka fiirsada intaydaan falin.**

Dhalinyarada maanta waxay noqonayaan waalidiinta berri, sidaas darteed, Waalidiin aqoon leh noqda.

Arrinta Iskuuladu miyaaney mudneyn in wax laga qabto ?


Xilligii Cabbaasiyiinta, dalalka Yurub waxay ahaayeen qaar ka dib dhacsan Muslimiinta,


يمكن أن يكون التعليم لا إنسانيا إذا كان عملية من جانب واحد ، موجّها وقائما على تلقين تعاليم حزبية ، إذا لم يكن يعلّم الفرد كيف يفكر بطريقة إستقلالية ، إذا كان يقدم إجابات جاهزة إذا كان يُعدّ الناس للوظائف المختلفة بدلا من توسيع أفقهم ، وبالتالي حريتهم




Hekams.com / علي عزت بيغوفيتش

- Imikana qaab fekerka oo keliya ayaa muslimiinta ka hor taagan iney ka horumaraan Gaalada.







- Waa Miino, Sorry - Dhulka, Marka la Raaco Caqliyadda Shirkada khuraafaadka ee NASA .
BEEN FAKATAY.

■ Kanaalka Xaqiiqada shirqoolka iyo Fashilinta Shubhaadka. (Arabic)
Telegram
https://t.me/aabb130

***

Qaybta 3aad :-

- Tijaabooyin ku saabsan Iskuulada .



-Qeybtani waa Tijaabooyin aan soo Qoray oo aan ka dhex sameeyey ama ka dhex arkay Iskuulada , waa dhacdadii iyo waxyaalaha aan ka fahmay .

- Iskuuladu waa keligood-Taliyeyaal .

  -Maalin ayaa waxa noo soo gashay Xiisad xisaab aheyd, Macalinkii wuxuu qoray bogag Ingiriisi ah, kadibna wuu baxay.

  2 xiisad oo xisaab ah ayaa loo lahaa maalintaas. Xiisadii kale ayuu soo galay Nusa-saacaha kadib,
  Qoraalladii ayuuna doonayey inuu akhriyo, xisaabtii qoraalkuna waxay u baahnayd 2 layn oo qeexid ah iyo ka-shaqeyn keliya.

  Arday ayaa ka codsaday macalinkii inuu ingiriisidan koobo oo uu ka-shaqeeyo keliya, laakiin macalinkii wuu diiday oo wuxuu sheegay iney isku-xidhan yihiin .

  Dhacdadan waxa ka muuqata in macalinkaasi uu bixiyey jawaab dood-ka-baxsi ah iyo inuu ardeyda u arkayey xayn-xoolo ah, sidoo kale Aanuu la tashan ardayda.

  Marka la joogo Iskuulka, wixii aad codsato waa laguu qaban laakiin waxba kuma darsan kartid ayaga, Waa waxyaalaha aan ka dhex arko sheekadan ayna suurta-galka tahay inay kasoo yeedho afka Maamuleyaasha Iskuulada .

- ## Jeclow Maadadeyda ama Jaxiimada Qabo .

  -Intan waxaa dhaha macalin kasta oo Iskuul dhiga misena Negative ah, oo Soomaalida ku Abtirsada.

  Maalin ayaa waxa noo soo galay macalin, arday ayaa Sheekaysay ama hadashay, wuxuu yidhi: "Cidii xiisada dooneysaa ha I dhageysato, Cidii kalena ha iska baxdo ".

  Maaha suurta-gal in hal maado jeclaanteeda la isku raaco, ama nacaybkeeda, Ma dhacayso abid.

  Halkaa waxa ka muuqda jahliga macalimiinta Iskuuladu ay ka qabaan habka loo xaliyo khilaafaadka .

- ## Waxay ku faanaan dhamaystirnaan lakin iyagu ma dhamaystirna .

  -Maamule ayaa maalin noo soo galay, xiisada oo dhan isaga ayaa hadlayey. Wuxuu na faray ama nagu amray in aan Qorshe-Sanadeed samaysano !
  Halka sida saxda ahi ay tahay inaad waqtiga uun ka faa'iideysato oo aanad Qorshayn iskuba howlin.
  Qorshe fulin la'aan ahi waxba ma taro. Amarkana Ardaydu maaha xayn dameero ah. Caajis ayuunbuu keenaa qorshaha badani.

  Sidoo kale, waxay dhahaan : "Waxa buuga ku qoran {Buuga dowlada} ayuunbaa sax ah wixii kale waa khalad ". Oo u-laabasho waxa u ah buugaagta dowlada, Tanina waa wax lagu qoslo !!!!

- ## Iskuulku waa English iyo Meel-madhan .

  -Maalin ayaa waxa noo soo galay macalin kimistari ahaa, waxyaalo matter ku saabsan ayuu Qoray, maalintii xigtay wuxuu na weydiiyay su'aalo, Aniga ayaa mid kacay oo waxaan kaga jawaabey Ingiriisi ka duwan tii uu qoray lakin isla halkii uun ah, Waanan saxay. "*Waad dedaal badantahay"* ayuu igu yidhi. -Maalin kale ayaa waxaa noo soo galay Biology, erey ingiriisi ah ayuu qoray, Ereygii ayuu macnayaal iyo tusaalooyin ka sheegay kadibna wuu dhaafay!

  - Iskuulka waxaad ka heli kartaa luuqado qallooca, Macluumaad bug ah, Iyo dhibic aad u yar oo Run ah.

- ## Iskuulku waa Hasha geela cunta ee Cabaada Hadana !

  - *"Dedaal"* Waa ereyga ugu badan ee uu adeegsado macalin-kasta oo Iskuul dhiga, Hadana iyagu ma dedaalayaan. !!!

- Inta xidig magaceed lagu baro ayaa la odhanayaa "*Dalkan adaa dhalinyaro u ah". !*
- Inta laguu sheego taariikh khaldan ayaa la odhanayaa *"Wixii soo dhacay waxba kama ogid" !*
- Inta ardaygii/Ardayadii - khuraafaad la baro ayaa la odhanayaa "*Wuu waalanyahay", "Wey waalantahay".*
- Ingiriisi ayaa ardaygii/yadii lagu gumaysanayaa hadana isla luuqadan lama saxayo.

- Gaalada ayaa ardaygii/ardayadii la jeclaysiinayaa kadibna waxa lagu odhan "*Miyaanad muslim aheyn ?".*

  Iskuulku waa dabinka jiirkee, Jiilasha soo koraya ha ku gurina dabinka jiirka.
  Ee bara diintooda iyo xirfado ay ku shaqeystaan, Intaa wixii dheer looma baahna .

➢ Akhlaaqda .

-Iskuulka: Ardaygii waa la bari xidigaha, dhulalka, Uur-ku-jirta. Laakiin, Akhlaaqdiisa ama Akhlaaqdeeda Eber ayey noqonayaan. Sababtoo ah waxay ku milmayaan dad hoosta ka ah xayawaan oo muuqaalka uun dad uga eg'. Macalinkii markuu xanaaqo, Ardaydii wuxuu barayaa siyaasada Cayda iyo Is-ciil-kaambiga.

Ardayda munaafiqiinta ah waxay barayaan waallida iyo siduu diinta uga bixi lahaa, Dameeruhuna waxay barayaan sida dameer loo noqdo !!

Kadibna waxa soo baxaysa Ardaydaas 12ka sano wax soo dhiganaayey ee aan laheyn xirfad, Waxbadanna aan ka aqoon diintooda Islaamka. Hadana Raadinaya shaqo kadib 4-sano oo Jaamacad ah, kuna Andacoonaya Dalka shaqo kama jirto!, Aqoon-yarida dadka noocan ah sabab wey u noqon karaan badnaanta Qoys-burburka iyo shaqo-la'aanta baahsan.
Ogow*: Shaqo la'aani waa Caqli la'aan muuqata .*

- ## Abuurtaada ayaa la dhaleecaynayaa .

- Wax ayaa la sheegayaa, Waadba ilowday, kadibna waxa lagu weydiin wixii la sheegay, kamana jawaabaysid wax aanad garaneyn, kasoo qaad inaad tidhi "*Ma garanayo",* kalmaddani qeyb weyn ayey ka tahay cilmiga laakiin iyagu haddii dugsi hoose la joogo – dhangad ayey keensaneysaa kalmadani. Marka la joogo dugsi sare kalmadani waxay keenaysaa in lagu saaro ugu yaraan.
Waxa lagugu aflagaadayn damiin, in Aanad kasoo bixin wixii laguu diray. Runtii Cadaadis xaq-darro ah weeye.
Mararka qaar, dhakadaada iyo qeybo kamid ah jidhkaaga ayaa la caayayaa.
illeen qofna ismuu abuurine, dhaleecaynta ka daaya Allah, sababtoo ah Allah ayaa abuuray dadka oo abuurtiisa aad caayeysaan ama cambaarayneysaan.

Haddii la igu dhaho sifee Iskuulada, waxaan ku tilmaami lahaa kaniisad soo luntey oo Ruhbaantii {Macalimiintii} ay dhex-joogaan, oo loogu talo-galay ka-takhalusida Akhlaaqda, Islaamka, Fakarka iyo Taariikhdaba.

- ## Waxaa laguu tabobarayaa sidii addoon aad u noqon laheyd .

- Aragtiyaha kelvin, Cramer, Newton, Aristotle iyo kuwo kale ayaa loo dhigayaa Ardaygii/yadii. Lamana ogola iney iyagu waa Ardaydee – Ay keenaan Aragti keliya, Haday keenaanna waa la dhinac-marayaa oo waa la dhaafayaa .

Sida uu xusayo Aadan Sahan oo ah Ninka leh kanaalka YouTube ee la magac-baxay "Sahanka Xogaha",
- Aragtida Aqooneed waxey ku timaadaa :- Qofbaa fekeray,

Maanka tuujiyey, Timaha shiilay, Fikrad ayuu soo jeediyay uu wax uun u cuskanayo.
Marka koowaad, Waa lagu qoslaa
Marka labaad, Dad taageera waa la heli - *{Qaata ama dan ku arka}.*
Marka saddexaad, Waa la qaadaa-dhigaa.
Marka u dambaysana, Waa la tijaabiyaa .

Markey Fikradu soo marto marxaladahan oo la tijaabiyo, ayay noqotaa Wax anfac leh ama Wax lagu qoslo. {[9]}

Habkii Aragti lagu Sameynayey maadaama aynu ogaaney, Aragtiyo keena !

- ## Iskuulka: Hablaha ayaa ka dhibco sarreeya Inamada.

-Waan arkay taas, Maktabad ayaan maalin galay oo hablo ayaa ka buuxay.
Macalimiinta-Iskuuladu waxey inamada ku canaantaan gaabis ay la yimaadeen oo tan sababsatay, laakiin waa been hadalladoodaasi, Anigu ma ammaanayo Raga mana hoos-dhigayo Hablaha, se labadaba waan ixtiraamayaa. Sababtu waa siduu xusayo Ad-ham Sharqaawi buugiisa {**للرجال فقط**} , Waa Abuurta, habka ay u kala fekeraan iyo habka ay u kala shaqeeyaan.
Ninku wuxuu u fakaraa hab sanduuq, meel keliya ayuu mar ka fekeri karaa kana shaqeyn karaa. Suugaanta isagoo ku dhex-jira kama shaqeyn karo carabida. Isagoo xisaab ka shaqeynaya ma akhriyi karo sayiska. Halka Inantu ay taas liddigeeda ay samayso, Inantu iyadoo Carabida akhrinaysa

[9] - Kanaalka "Sahanka Xogaha" ee YouTube.

ayey ka shaqeyn kartaa xisaab, howlo badan ayey hal mar isku wada qaban kartaa, sababo kale oo badan oo Aanan xuseyn wey jiraan, laakiin tani waa sidaan u arko, oo xaga takhasuska waa lagaga fiicnaan karaa hablaha, waana lala xidhiidhin karaa xaga tartanka, xifaaltanka iyo Caajiska raga qaarkood .

➢ Adoomaysiga Iskuulada .

- Haddii aad maado ka gaabiso waxay kuugu hanjabi in dhibco ay kaa goosanayaan.
Haddii hanjabaaddoodan aad is-moogsiiso ~ waxay kuu faalinayaan Mustaqbal madow.

- *Mustaqbalka yaa ku xidhay Iskuul ?*

- Shirkadaha AlPhabet iyo Metaverse waxay qortaan dad xirfado leh mana daneeyaan Iskuul **{[10]}** , sidoo kale macallinimadu kuma xidhna Iskuul, Macalin ayaa aan arkay kaas oo dugsiyada sare wax u dhigi jiray laakiin isagu aan soo qaadan dugsi-sare.

Meel ay wax kaaga soo noqonayaan ayaa lagu bixiyaa lacag, waqti iyo dedaal. Laakiin ka warran haddaad intanba ku khasaarayso Haan gun la' .
Sidoo kale macalimiinta iskuuladu waa caadifiyiin.

[10] - Kanaalka: Ogaansho – YouTube.

- ## Maxaa yaalla Iskuulka ?

  - Wax lagu tilmaami karo faa'iido waxa yaalla luuqadaha iyo Xisaabta, dhammaantood si fiican laguuma barayo. Luuqad ilaa aad adigu is-bartid ma baranaysid, Xisaabtana boqolkiiba **5%** ayaa aad uga baahantahay noloshaada.

  Macaahid luuqado ah ayaa jira oo luuqadaha aad kaga kaaftoomi karto.
  Faculty xisaab ah wuu jiraa oo Jaamacadaha sare ah.

  Markaas wixii ugu muhiimsanaa iskuulada hadaad ka maarmi karto maxaad ka dooni ?

  F.G: Maadooyinka iskuulada wixii aan luuqado , xisaab iyo diin aan aheyn waa **Hantaatac .**

  Haddii aad diin baraneyso, mac-hadka qabo, ama adigu is-bar .!

- ## Ganacsiga .

  -Waxaynu ognahay in ganacsigu yahay isha dhaqaale ee ugu weyn.

  Iskuulka waxa lagu barin noocyadii uu ka koobnaan jirey ganacsigii waayadii hore, Taariikhdiisii. Laakiin laguma barayo sida ganacsi cusub loo bilaabo, sababtoo ah dadka dhigta iskuulada ayaa laga ganacsadaa, oo ajendahoodan inaad fahanto ayaa lagaa ilaalinayaa !

Fikrad ayuu ku bilaabmaa ganacsigu kadibna kooto ayaa lagu xidhaa si aan loo koobiyayn.

- Fikradda Ganacsi waa inay ahaato mid :-
    1. Suurto-gal ah dhaqaale-ahaan.
    2. Shaqeyn karta.
    3. Wax soo celin karta. {[11]}

-Sida lagu helo Fikrad ganacsi :-

a) *Xooga-saar dhibaatooyinka haysta adiga iyo Bulshadaada .*
-Caqabadaha kula soo dersa adiga iyo dadka kale, kuwa ugu waaweyn, Is-waydii "Ganacsi ma laga abuuri karaa ?" .

b) *Is-waydii: Maxaa cusub ?*
-Liis garee waxyaalo Anfacaya bulshadaada oo aad ugu keeni karto halka aad joogto.

c) *Meel hoose wax ka eeg !*
-Muhiimadu waa inaad raadiso baahiyaha yaryar, kadibna aad daboosho kuwa aan la daboolin, oo sidaas ganacsi aad kaga abuurato.

d) *Xirfadaada Isticmaal !*
-Maaha waxaad baratay oo keliya, balse dhammaan waxaad awoodo.

e) *Raadi ganacsiyada duqoobay !*
-Kusoo kordhi horumar -Ganacsiga duqoobay- kadibna ka faa'iidayso. !

f) *Keen ama samee Alaab ka raqiisan/jaban kuwa jira.*
-Inkastoo Aaney sal-adag ku fadhiyin tani, hadana waa waxyaalaha ugu fudud ee suuqa aad ku geli karto.

g) *Baadhitaan ku samee waxa dadka ka maqan.*
-Kadibna keen oo ka ganacso .

[11] - Intan waxaan kasoo xigtey il aan la garaneyn.

h) Fikradaha Internetka shaqeeya.
E-commerse waa uu ka kharash-yaryahay abuuristiisu ganacsi xarun leh. **{[12]}**

- Intaas kadib, waxa laga yaabaa inaad I weydiiso:

→ Waa maxay xidhiidhka ka dhexeeya ganacsiga iyo Iskuulka?

Iskuulku wuxuu ka ganacsadaa Ardaydiisa mana fahansiiyo habka loo ganacsado. Markaa tani waa si aad u fahanto ganacsiga saxda ah.

Fakarka ayey iskuuladu kaala dagaalamayaan ee markaad fahantay Aragtiyaha-Aqooneed iyo Fikradaha-ganacsi, Ka-shaqaysii Fakarka !

➢ Canaanta .

- Waxa la yidhi: Canaantu haday ka badato xadkeeda, wax ayey dumisaa.

Iskuul kasta, macalin ayaa Ardayda canaananaya, ilow ama hadal ayuuna ku Canaananayaa.
Tanina waa cadaadis si Adoomo looga dhigo ardaydii. Anigu dhagaha ayaa aan ka fureysan jiray waanan is-moogsiin jiray, Sababtoo aheyd iyaga ayey cuqdadaasi ku jirtey. Oo anigu shaqo kumaan lahayn.

Sidoo kale, cabaadka iyo xanaaqa la socda hadalladooda waa Boor-isku-qaris, Waxaan ku odhan lahaa macalimiintaas – *"U dhinta Cadhadiina !"*

[12] - ©Bogaal.web.

Qiyaaso aan jirin ayaa la iska qabsanayaa oo lagu Canaananayaa Ardaydii .
Halka Qiyaastu Aaney shaqo ku lahayn Runta !

➢ Maaha Muhim .

- Cidii aan muhiimad-siin Iskuulada Ismoogsiisane, Ayaa imtixaanada ugu sareysa.
Anigu muhiimad maba siin jirin hadana Imtixaano badan ayaa aan keenay dhibco sarreeya. Halka mar aan Tijaabo sameeyey aan aad u daneeyey dhammaan Maadooyinka kadibna, Imtixaano badan aan dhibco hoose keenay.
Nin aan aqaan ayaa u muuqan jirey mid aan saasba u daneyn laakiin fasalkiisa ugu sarreyn jiray.

Wixii muhim ah Muhiimad sii, wixii aan Muhim aheyn sida Iskuulada ha siinin Muhiimad !

➢ Malcaamadaha !

- Maadaama aynu buugan ku cadeynayney Lugooyada-Waxbarasheed ee Iskuuladu ay u geystaan dadka dabinkooda-khiyaameed kusoo dhacay, waxa ma-huraan iyo qasab noqotey in aynu sidoo kale cadeyno Lugooyada Malcaamaduhu u geystaan Caruurta iyaga oo kusoo dhuumanaya ***Shaadhka-Quraanka,*** sababta keensaneysana waa iney jiraan caruur isku dhigata Iskuul iyo Malcaamad .

Malcaamaduhu qaab khaldan ayey ardayda Qur'anka u baraan, waxay ku baraan Xoog iyo Qaylo, halka Allah uu leeyahay – **{لا اكراه في الدين}** [13]

Anigu malcaamadeydii Naceyb ayaa aan uga baxay laakiin Nidaamka iyo macalinka aan necebahay ee ma necbayn Qur'aanka !

Sida saxda ah waa in si Naxariis leh ardayda loo baro Quraanka loona Raaciyo Tafsiirkiisii, weliba la dabaqo maahmaahda carbeed ee tidhaahda:

- Ha noqon mid aad u adag, hadii kale waa lagu jabin, hana noqon mid aad u jilicsan hadii kale waa lagu tuujin.



Malcaamaduhu haddii Aaney wax ka bedelin nidaamkooda, Caruurtiina ha ku tuurina meeshaas waalidkoow, ee idinku bara quraanka ayaan idin odhan lahaa Jaallayaal.

Marka Allah dartiis, si naxariis leh arday wax loo barayo. Wey ka duwantahay Marka lacag darteed si xanaaq, qeylo iyo dhangad leh arday wax loo barayo.

Waalidow, ilmahaaga adigu bar diintiisa sidoo kale ku dar goobaha tayada wanaagsan ee xirfadaha lagu barto, Ama u keen Macalin-Guri Kahor inta Aanad tallaabooyinkan qaadinna adigu gacantaada wax ku bar.

Ilmo aad adigu wax bartey horraantii, Sidoo kale yaqaana diintiisa iyo xirfado uu ku shaqeysto, Maxaa kale oo uu u baahanyahay ?
#Maya_Iskuulada. *#Maya_Malcaamadaha* .

[13] - Aayada 256 Suurada Baqara.

- Maado keliya hadaad ku fashilanto, waxa lagu odhanayaa: Waxbarashada kuma fiicnid.

  -Tani waa cadaadis xaga macalinka ka imaneysa.

  Maalin ayaa macalin noo soo galay, wuxuu sheegay in arday ay fasalka ku dheeraad yihiin. Sidaas darteedna, Aaney waxbarashada ku fiicneyn.

  Ardaygu hadduu meel ku yara liito maaha in lagu tuhmo in si-kasta uu ugu liito waxkasta, Tani waa dulmi iyo been. Ha rumeysanina ayaa aan ku odhan lahaa Ardayda !

- Iskuulku waa Haan gun la' .

  -Waxaas oo dhan ee dedaal, tamar, waqti iyo lacag kaaga baxay Iskuulka ma soo noqonayaan. Maal-gashina ma noqon karaan, halka goobaha xirfadaha, Lacagta aad bixiso ay maalgashi tahay oo wax ay soo celin karto haddii fakar fiican la helo .

- Hablaha .

  -Waxaan arkay ayaa aan idiin sheegayaa !
  Waxaan arkay Sadex hablood oo Macaahida dhigan jirey, 2 kamid ahaa saddexdan waxay dhameeyeen Secondaryga Mac-hadka, Inan ku jirtay labadanna, Jaamacad sharci ah ayey dhigan jirtay.
  Sidoo kale, waxaan arkay Sadex hablood oo Iskuulada Secondaryga ah dhigan jirey, Weliba Form4 wada ahaan jirey.

Lixdaas hablood:- 3da Macaahida dhigan jirey & 3da Iskuulada dhigan jirey.
- Waxa ay ku kala duwanaayeen: Niqaabka, Qosolka iyo Ixtiraamka.

- Sadexda Macaahida dhigan jiray, 2 ayaa joogto u sidan jiray Niqaabka .
- Sadexda Iskuulada dhigan jiray, Inan keliya ayaa joogto u sidan jirtay Niqaabka.

- Sadexda Macaahida dhigan jiray, wey ka qosol-qarsoonaayeen sadexda Iskuulada .
- Sadexda Iskuulada dhigan jirey, wey ka qosol-muuqdeen sadexda macaahida dhigan jiray.

- Sadexda Macaahida dhigan jiray, aad ayey u ixtiraam badnaayeen.
- Sadexda Iskuulada dhigan jiray, ixtiraam wey lahaayeen, laakiin wey ka ixtiraam yaraayeen kuwa dhigan jiray Macaahida.

- Intan sare waa Isbarbar-dhig gaaban oo sadxi ah, waxaynu ka fahmaynaa in Inanta Muslimada ah ee sharafta leh ay u fiicantahay in diinteeda Islaamka ay barato si ay hadhow caruurta ugu sii Ababiso, sidoo kale ay barato xirfado si hadhow haday dantu kalifto inay shaqeyso ay uga faa'iideysato nolosheeda.
Inanta oo maadi barata, wax faa'iido ah maleh, Maalin ayaa aan arkay hablo habsan ahaa oo lagu bah-dilayey Iskuul, Oo bacadka la Istaajiyey – Canaan iyo Hanjabaadna loogu daray.

- Inantu maxay Iskuul uga baahantahay ?

Miyaaney aheyn iney noqoto sidii Hooyooyinkii Asxaabta Madaahibta 4ta ah, Oo ay inoogu soo saarto Rag sidii Imam Shaafici ama Imam Maalik !
Hadaba diintaada baro Inaney, si aad u noqoto sidii Hooyadii Imam Axmed oo goor Salaad hore ah biyaha u diirisey si uu ugu weysaysto, kadibna kaxaysay oo masjidka gaadhsiisay, kadibna soo saartay Axmed bin Xanbal aynu maanta wada naqaano.
Inantu waa laf-dhabarta bulshada, uma baahna Iskuul iyo Maadi, Hawl taas ka weyn ayaa ay haysaa, Waxa ay dhisaysaa Jiil cusub oo Maamuli kara inta u dhaxaysa Portugal ilaa badhtamaha Shiinaha.


Ogaada, Iskuul wuxuu daneeyaa dhibcaha ee ma daneeyo Qofka, waxaana Cadeyn u ah sheekada Thomas Edison ee laga eryey Iskuulkii . – Sida uu leeyahay Ad-ham Sharqaawi .

لا يمكننا أن نقنع الجيل الجديد بأن التعليم هو مفتاح النجاح طالما نحن محاطون بخريجين فقراء ولصوص أثرياء



روبرت موغابي

Hekams.com



